



KULANKA 1

BAAHIYAHA AADANAHA - XUQUUQDA AADANAHA – MAS'UULIYADAHA AADANAHA

Rugta Bandhigga ee Xuquuqda Aadanaha

Boorar





MAQAALKA 1

Waxaan ku dhalannay xornimo
iyo siman, waxaana leenahay
fikirradeenna iyo ra'yigeena.
Dhammaanteen waa in si isku
mid ah loola dhaqmaa.





MAQAALKA 2

Xuquuqdan waxaa iska leh qof
kasta oo bini'aadam ah;
ha ahaato taajir ama faqiir,
waddan kasta oo aan ku nool nahay,
jinsi kasta ama midab kasta
oo aan nahay,
luqad kasta oo aan ku hadalno,
wax kasta oo aan u malayno
ama aan aaminsannahay.





MAQAALKA 3

Dhammaanteen waxaan
xaq u leenahay nolol
iyo in aan ku noolaano
xorriyad iyo badbaado.





MAQAALKA 4

Qofna xaq uma laha
in uu naga dhigo addoon
manna ka dhigi karno
qof kale addoon.





MAQAALKA 5

Qofna xaq uma laha in uu na
dhaawaco ama na jir dilo
ama si arxan darro
ah noo la dhaqmo.





MAQAALKA 6

Dhammaanteen waxaan xaq
u leenahay in sharcigu
noo aqoonsado
qof ahaan.





MAQAALKA 7

Sharcigu waa iskuugu
mid qof walba.

Waa inuu si cadaalad ah noola
dhaqmaa dhammaanteen
oo uu naga ilaaliyaa takoorka.





MAQAALKA 8

Sharcigu waa inuu
ilaaliyaa xuquuqdeenna
oo uu caawiyaa marka qof uu ku
xadgudbo xuquuqdeenna.





MAQAALKA 9

Qofna xaq uma laha in uu na xiro
ama xabsi na dhigo iyada oo aan
lahayn sabab wanaagsan,
ama in uu naga
saaro dalkeenna.





MAQAALKA 10

Haddii qof lagu eedeeyo
in uu jebiyay sharciga,
wuxuu xaq u leeyahay
inuu helo maxkamad caddaalad
ah oo dadweyne ah.





MAQAALKA 11

Qofna laguma eedayn karo
in uu wax sameeyay ilaa laga
caddeeyo in uu sameeyay.
Haddii dadku dhahaan waxaan
sameynay wax xun, waxaan xaq
u leenahay in aan caddayno
in aysan taasi run aheyn.
Qofna waa in aanu nagu ciqaabin
wax aanan sameyn, ama sameynta
wax oo aan sharciga ka
soo horjeedin markii aan sameynay.





MAQAALKA 12

Qofna waa in uusan isku dayin in uu sumcaddeenna wanaagsan wax u dhimo. Qofna xaq uma laha in uu gurigeena soo galo, furto warqadaheena, ama qoyskeena ama na dhibo sabab la'aan.





MAQAALKA 13

Dhammaanteen waxaan xaq u leenahay in aan aadno meesha aan rabno ee dalkeenna iyo in aan u safrno dibadda sida aan u rabno.





MAQAALKA 14

Haddii aan khatar ugu jirno in dalkeenna nalagu dhibaateeyo, dhammaanteen waxaan xaq u leenahay in aan u cararno dal kale oo ammaan ah.





MAQAALKA 15

Dhammaanteen waxaan
xaq u leenahay in aan
ka mid noqono waddan
– muwaadinimo.





MAQAALKA 16

Qof kasta oo qaangaar ah
wuxuu xaq u leeyahay inuu guursado
oo uu yeesho goys haddii uu rabo.

Qofna laguma qasbi
karo inuu guursado.

Ragga iyo dumarku waxay leeyihiin
xuquuq isku mid ah marka ay is
guursadaan iyo marka ay
kala tagaan.





MAQAALKA 17

Qof kastaa wuxuu xaq
u leeyahay in uu wax
yeesho ama uu la wadaago.
Qofna waa in uu naga qaadin
waxeena sabab wanaagsan la'aan.





MAQAALKA 18

Dhammaanteen waxaan xaq u leenahay in aan nafteena ka fikirno oo aan raacno damiirkeenna, in aan aaminsanaano oo aan yeelanno diin.

Dhammaanteen waxaan xaq u leenahay in aan keliya ku dhaqanno caqiiddooyinkeenna ama dadka kale, dadweynaha iyo kuwa gaarka ah. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu beddelo caqiiddooyinkiisa iyo diintiisa haddii uu rabo.





MAQAALKA 19

Dhammaanteen waxaan xaq u leenahay in aan helno macluumaadka, in aan go'aansanno oo aan qabno, muujinno oo aan la wadaagno ra'yigeenna iyo fikradaheena dadka kale meel kasta oo ay ku nool yihiin, iyada oo loo marayo hab kasta oo aan rabno tusaale ahaan buugaagta ama internetka.





MAQAALKA 20

Dhammaanteen waxaan xaq u leenahay in aan la kulanno asxaabteena oo aan abuurno kooxo wax wada qabta, oo ay ku jiraan in aan si nabad ah u difaacno xuquuqdeenna. Qofna naguma qasbi karo in aan ku biirno koox haddii aanan rabin.





MAQAALKA 21

Dhammaanteen waxaan leenahay xuquuq isku mid ah oo aan ku tartami karno doorashada iyo in aan ku biirno adeegga dadweynaha. Qof kasta oo weyn wuxuu xaq u leeyahay inuu u codeeyo hoggaamiyeyaasha siyaasadda doorashooyinka caadiga ah. Dhammaan codadku waa siman yihiin waana in si qarsoodi ah loo sameeyaa.





MAQAALKA 22

Dhammaanteen waxaan xaq u leenahay inaan guri yeelanno, in aan helno lacag ku filan oo aan ku noolaano iyo in aan helno gargaar caafimaad haddii aan xanuunsanno.

Dhammaanteen waa in naloo oggolaadaa inaan ku raaxaysanno oo aan muujinno nafsaddeenna iyada oo loo marayo muusig, farshaxan, farsamo ama isboorti, iyo in aan isticmaalno xirfadaheena.





MAQAALKA 23

Qof kasta oo qaangaar ah wuxuu xaq u leeyahay in uu shaqo helo, in uu helo mushahar caddaalad ah shaqadiisa, iyo in uu ku biiro urur shaqaale.





MAQAALKA 24

Dhammaanteen waxaan
xaq u leenahay in aan
ka nasano shaqada
oo aan nasiino helno.





MAQAALKA 25

Dhammaanteen waxaan xaq u leenahay nolol sharaf leh, oo leh cunto ku filan, dhar, hoy iyo daryeel caafimaad. Hooyooyinka iyo carruurta, dadka aan shaqada haysan, waayeelka iyo dadka naafada ah dhammaantood waxay xaq u leeyihiin in la caawiyo.





MAQAALKA 26

Dhammaanteen waxaan xaq u leenahay waxbarasho.

Waxbarashada aasaasiga ah waa in ay noqotaa bilaash. Waa in aan awoodnaa in aan baranno xirfad, ama aan ka faa'iideysanno dhammaan xirfadaheena.





MAQAALKA 27

Dhammaanteen waxaan
xaq u leenahay dhaqankeenna,
iyo in aan ku raaxaysanno
waxyaabaha wanaagsan
ee sayniska iyo waxbarashadu
ay bulshada u keenaan.





MAQAALKA 28

Waxaan xaq u leenahay in aan ku noolaano bulsho iyo adduun nidaamsan oo nabad ah si aan u helno xuquuqdeenna iyo xorriyaddeenna.





MAQAALKA 29

Waajib ayaa naga saaran
dadka kale waana in aan
ilaalinaa xuquuqdooda
iyo xorriyadooda.





MAQAALKA 30

Dowlad ama qofna looma ogola
in uu u dhaqmo si ka
xayuubinaysa xuquuqda
iyo xorriyadaha
dadka kale.

